Dadka waxaa ugu shar badan kuwa ay saacadu ku dhacdo iyagoo nool, iyo kuwa qabuuraha ka dhigta masaajid

Cabdullaahi Binu Mascuud-Allaha ka raali ahaadee-waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay-nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee- isagoo dhahaya: "Dadka waxaa ugu shar badan kuwa ay saacadu ku dhacdo iyagoo nool, iyo kuwa qabuuraha ka dhigta masaajid".

[Xadiis Xasan ah] [Waxa wariyay Axmed]

Nabigu wuxuu sheegay-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- dadka ugu sharka badan, oo ah kuwa ay saacadu ku dhacdo iyagoo nool, iyo kuwa qabuuraha ka dhigta masaajid, kuna tukada qabuuraha xageedana u tukada.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3375